



---

# WAAD AWOODAA

---

Qormooyin kooban oo wax ku tari kara



## GULAIID CASAAN

2021

## 1/30 Ma awoodaa?

Waxa aan bilaabi doonaa in aan nafteyda cariyo mudo dhan Hal bil, adiguna waad ila socon doontaa, waxa aad ila wadaagi doontaa guusheyda iyo guul-darrodeyda labadaba.

Hawshu sida tan ayey u dhici doontaa, qor qormo cusub maalin kasta, qormadaasi waa in ay ahaataa mid cusub oo aad hal-abuurtey maaalinkaas, waa in aad ka curisaa dhacdooyinkaaga maalinlaha ah, sida wax kaa farxiyey ama kaa nixiyey, waxa aan wax ka qori doonaa wax aan akhriyey oo wax I taray, waxa aan kula wadaagi doonaa sheeko i qabsatey oo mudan in la faafiyo, waxa ay noqon kartaa qormadu talo waqtiyada qaarna ha ahaato mid madadaalo ah, Al-Muhim wax qor si joogto ah.

Waxa aan sidan u samaynaya si aan u layliyo kartidayda qoraal, waxaana la sheegaa in qabashada joogtada ahi ay kobciso heerka aad ka taagantahay waxaas aad ku celcelisay.

Maxaan u doortey Qoraalka?

Wixii la qoraa Uu waaraa, intaasba waxa dheer aniga aaya si gaar ah u jecel ilaa yaraanteydiina waan jeclaa qoraalka.

Waxa ay su'aasha ugu muhiimsani tahay: ma ku guulaysan doonaa arrintan?.... Mooyi se aan ku rajo

weynaado in aan ku guulaysan doono Rabbina ii fudeydin  
doono.

Adna marag ka noqo.

## 2/30 Birkintaada badal si aad caalamka u bedesho

Kula kaftami maayo, wax yar oo aan macno lahayn sida birkintaada oo kale ayaa noloshaada oo dhan dhinaca kale u rogi kara.

Mudo yar ka hor ayaa birkintii aan ku seexan jiray layga badalay, waxa halkeedii ii gashay mid kale oo ka yar weyn tii hore, waxa aan bilaabay in aan dareemo damqasho yar oo ah dhinaca dambe ee qoorta, kaas oo u soo kordhaayey si joogto ah.

Si lama filaan ah ayuun baan subax dhawayd kusoo toosey muruq iga haya qoorta, salaadii duhur ayaan bilaabay in aan dareemo garaac xooggan, sujuudii markii aan galayna waxa igu soo boodey damqasho aanan weligay arag wax la mid ah, waa aan cabaadey heer uu ila yaabaya kii igu ag sujuudsanaa.

Si degdeg ah ayaa waxa i xidhmay dhamaan muruqyadii qoorta ee dhinaca bidix, dhaqdhaqaqa waan yaraystey si aanan u dareemin arxanka daran ee hore aan ula qayliyey, waan jiifsadey..... sidii iyo si kasii daran ayaa la ii qabtey, caruurteydi yarayd ayaa kolba i eegaya oo leh “Aabo maxaad la dhacdhacaysaa?..” waxa ay la yaabeen sida aan u galgalnaayo xanuun awgii.

Casarkii ayaan shaqo tagey aniga oo is-leh wax badan ma qabtid hase ahaato'e halkaas ayaa iigu danbeyseyba

dhaqdhaqaaq dambe, dhinacan ma eegi karo, halkan uma jeedsan karo, fadhiga ma bedeli karo, in aan kacaan suurta-gal iima aha, iyada oo sidaas ah ayaa Maqrib la ii eedaamey, ma kicis ayaa igu jirta, ha sheegin, waxa aan bilaabay in aan ku tukado fadhiga, oo aan dhaqdhaqaajiyo indhaha oo keliya, meel kale ma jirto.

- Ma waqtigaygii ayaa yimid?
- Ma naafo ayaan noqon doonaa?
- Ma xaarka ayaa la iga guri doonaa iyo kaadida?
- Ma culays la karahsado ayaan ku danbeyn doonaa?

Weydiimhaas iyo qaar kale oo aanan hada wada xasuusan ayaa maskaxdeyda ku wareegaya.

Waxa i hor-yimid dhamaan wixii aan ka gaabiyyey ee ahaa xaqii Ilaahay iyo kii aadamaha labadaba, waxa ii sawirmay iyada oo ay wada istaageen dhamaan mashaariicdii iyo afkaartii wacnayd ee aan ku hanka weynaa, waxa ii sawirmay aniga oo culays ku noqdey qoyskayga, sidii qof naafo ah oo aan geeri iyo nolol midna ku sughayn, waxa ii sawirmay waxaas iyo wax kasii daran.

Ilaahay ayaa mahad iska leh Habeenkii xigteyba waan ka ladnaadey muruqii - aan idhaahdo cudurkii - aan muruqa ahayn, waxa aan u qaatey sidii farriin adag oo la isoo diray oo kale, waxa aan u fahmay in ay ahayd digniin qadiman, waxa maaalintaas aan bartey in arrin yari noloshaada oo dhan ku ciyaari karo oo uu khatar gelin karo.

## Sxbkayga dhoohanoow

hooy awooda, caafimaadka, waqtii aad arkaysaa waa  
dhalanteed si kedis ah u baxsan doona ee haddaba  
diyaar ahaw, Birkintaadana bedel si aan cadaabaha  
lagaaga waraabin.

### 3/30 Masjidkii ayaan joogaa

Weligaa taas oo kale, Salaadii aya loo kacay mid aya lasoo baxay Kamaradiisii oo hada live sii galayaa, fariintiisu waa Masjikii ayaan joogaaye ogow.

Mid kale aya muxaadaro ku dhex-jira sawiro ayuu qaadayaa si uu usoo dhigo bartiisa facebook, wax kale maaha waa inaadeer l ogow in aan muxaadarooyinka dhagaysto.

Waa mid kale laba dhagax ayuu ka qaadey meel halkana, intaas kumu koobnaane sawir inta uu iska qaadey ayuu soo dhigay bartiisa, macnihiisa iska fahan..... wadooyinka waan hagaajiya weeye ee adna ii qir.

Qof aya wax bixinaya, mid kale aya wax baranaya, mid saddexaad aya wacdi wada, mid ku afar ah aya hawl qabanaaya intuba waa waajib –agtooda- in ay kuu sheegaan wax qabadkooda, hadii kale waxaad moodaa in uu lumaayo camalkaasi.

Waxa aad joogtaa xilgii siyaasada kamarada, waa sidii uu saaxiibkay odhan jiraye, looma baahna in aad wax qabato, balse waa in aad dadka tustaa in aad wax qabato, isku midna maaha.

Igu sawirtu waxa ay u darantahay cibaadada oo waa ay kaa burinaysaa ajarkii, waxa ay u darantahay aduunyada oo qofkii waxbaba qaban maayo inta uu ku dhaqmaayo igu sawirta, ardeyga waa ay u xuntahay oo isku sawirkha

jaamacada ayaa uga roon aqoonta jaamacada. Midhna iga qor, dadka qof walba tiisaa cuslaysey ee cidi kuuma jeedee hawlaaga iska wado adiga oo aan live soo gelin walaal.

4/30 Dad yaa u ayaan darran?

- dad yaa u ayaan daran?
- De dhalinyaro.

Waa su'aal aan isweydiiyey aniguna isaga jawaabay.

Ninka iyo gabadha dhalinyarta ahi maanta waxa ay ku jiraan xaalad adag dareen ahaan, waxa aan ka hadlayaa dareenka jinsiga ah ama Hamada, dhinac waxa ku socda mirqaankii heesaha iyo jacaylkoodii, dhinac kale waxa lagaga hurinayaan baraha bulshada iyo suntoodii, dhinac kale waxa Ololaysa Naftii, intaas waxa aad ku dartaan shaydaanka oo intaba soo kicinaya.

## 4/30 Maxaad la hormari la'dahay sxb?

Guusha aan kaa tuso meel aanad hore uga baran, waa arrin hadii aad iska jirto aad wax badan heli doontid adduunkan.

Waxa jira arrimo hadii aad samayo aad hanan kartid guusha, taas lidkeeda waxa jira arrimo hadii aad iska jirtid guushu ay saaxiib kula noqonayso waana halka aan wax kaa tusi doono. qaybta hore aan u bixiyo samee-da, qaybta kalena aan ugu yeedho iska-jirta. inta badan waxa aad looga hadlaa samee-da halka iska-jirta aan cidiba ka war hayn.

Iska-jirta aan kuu tilmaamo qodobka ugu weyn ee aad la hormari la'dahay, waa arrinka kaa hor-taagan aqoonta dhabta ah inyar oo igu sawira mooyee, arrinkani waa caqabada kaa hor joogta in aad la yeelato xidhiidh fiican Ilaahay SWT, waa deyrka kaa xiga inaad shaqo fiican hesho, ama aad samayso dakhli kugu filan. aan kusoo koobee waa dhibta ugu weyn ee aad la hormari la'dahay adduun iyo aakhiroba, arrinkaasina waa dunuubta.

Qofku uu dambaaba markaasuu ku waayaa arsaaq usoo socotey, uu dambaaba markaasuu dulli iyo hooseyn ku dareemaa, uu dambaaba markaasuu cabsi iyo khaakhaayiraad bilaabaa ku wajahan cid kasta, uu dambaaba markaasuu Ilaahay ku nacaa dadkuna ku

karhaan, uu dambaabaa markaasuu galaa god madaw oo aanu weligii kasoo bixi karayn, dambigu intaas iyo wax ka badanba uu keenaa ee bal horta ogow dadkana soo warayso.

Si aad u guulaysato sxb badso Tawbada, joogtee Istiqfaarta, iska jir dunuubta, Ilaahayna talo saaro, waxa aad arki adiga oo waxa aad u gacan qaadaaba kuu hirgal, si fududna u helay nolol Horumar leh.

## 5/30 Xafladii inanta

Arrinkanina ma ii hadhsanaa.

Waa inan xaflad dhigatey, waayo waxa ay gaadhey 1k Tiktok Flowers. Intaas hore aan kuu macneeyo Tiktok-ta dadka kala socda ayaa gaadhey kun qof. Wallee waa yaab bal weligaa tan oo kale ma aragtey?

Gartey hadii ay odhan lahayd 1M oo qof, ama 50K ama yaree oo dheh 10K, laakiin ismaan lahayn 1K ayaa loogu dabbaal degi doonaa sidaas oo weliba TikTok ah. .... Maan filanayn arrinkaas.

Asxaabeeey..

Maxaa ku jira dad badan oo kaala socda bartaada aad ku leedahay Internet-ka? maxaa kaaga faa'ido ah inaad hesho kumanaan daawasho ah? tirada daawashooyinka iyo dadka ku taageera ma noqon kartaa Halbeeg lagu qiyaaso wanaag ay cidi leedahay? hadii aad haa tiraahdid waad qaldantahay waayo Iblis ma cid baa ka taageero badan.

Waxa aynu joognaa waqtii Maalaa yacnigiii uu noqdey badeecada keliya ee la iibiyi, Heeso Maalaaycni ah, Riwaayado Maalayacni ah, warbixino maalayacni ah, Sawiro maalayacni ah, Muqaalo Maalaycni ah, Waxa aynu soo gaadhney waqtii ay dhalinyartu aanay lahayn han kale mooyaane, waxa aan gaadhey intaas oo kun oo taageerayaal ah.

Sxb inta aad yartahay maalgasho Naftaada, wax-baro, shaqayso, dadkaaga wax u tar, Cibaadodaada hagaaji, asxaab fiican kasbo.

Berri fiican si aad u hesho iska jir **samaynta, faafinta, daawashada**, iyo **faallaynta** mawjadaha Maalayacniga ah ee buuxiyey Baraha Bulshada, afartaa arrin iga qor, waa talo nin weyne.

## 6/30 Mashruuca Nolosha

Imisa jir ayaad tahay? Anigu welii maan dhalan sidaa ayaan filayaa. hadii aad ila yaabantahayna akhriso waxa ninkan qabsadey.

Nin ayaa booqasho ku yimid tuulo, dabadeedna waxa uu arkay dhaqan aad u cajab badan, dadka tuuladani marka uu qofi ka dhinto waxa ay ku qoraan xabaashiisa wax aan ahayn intii ay da'diisu ahayd, waxa ay qoraan wax aad uga yar da'diisii dhabta ahayd, oday boqol jir ahaa ayaa loo qorayaa 5 sano oo keliya, mid kale oo weyn ayaa loo qorayaa 3 sano, mid kale oo 3aad ayey da'diisa ku qoreen in ay ahayd 1 sano oo keliya.

Ninkii yaab, markii uu weydiiyeyna waxa ay ugu jawaabeen “ annagu waxa aanu xisaabinaa da'da dhabta ah ee qofka, taas oo ah inta uu dadkiisa wax u qabtey, wixii kasoo hadhayna looma tiriyo”.

Waqtigan aynu joogno waa laga maarmaan in uu qof kastaaba yeesho mashruuca Nololeed oo uu bulshadiisa wax ku taro, si aynu dalkeena u gaadhsiin heer kale.

Mashruuca Noloshu waa maxay?

Arrin kasta oo aad siiso fikirkaaga, waqtigaaga, kartidaada, oo waxtarkiisuna gaadhayo bulshada ayaan u aqaanaa Mashruuca Nolosha. Ugu danbeyntii adigu imisa jir ayaad tahay?

## **7/30 Si aad Horumuud u noqotid**

Waxa aad jeceshahay inaad noqotid hormuud, waxa aad rabtaa inaad noqotid qof dadkiisa magac weyn ku leh, waxa aad u xiiso qabtaa inaad noqotid qof qadarin mudan ..... hadaba aan ku tuso jidka loo maro arrintaas.

- **Diyaarso Mashruuc Nololeed.**

Si aad u diyaarsato mashruuc Nololeed oo guulaysta waa in aad samaysaa arrimahan soo socda.

### **1. Hel Fikrad.**

Marka ugu horeysa ogow oo raadi wax aad ku fiicantahay qabashadiisa, isku dey inaad qortid inta ugu badan ee fikrado ah ee aad qaban kartid, ugu danbeyn mid ka dooro aad awood u leedahay xiisona leh.

#### **Tusaale:**

- Mashruuca Miskiin-kalkaal
- Mashruuca Isbedel ✓
- Mashruuca Degaan fayoow.

### **2. Qoro Yoolka Fikradaada.**

Qor Yoolka fog ee aad ka leedahay mashruucan marka uu hir galoo, maxaad rabtaa in uu mashruucani hagaajiyo, intaas ka dibna qor dhowr Yool oo yaryar oo ku gaadhsiendoona Yoolkaaga weyn ee fog.

### Tusaale:

- **Yoolka Fog:**
  - Diyaarinta dhalinyaro toosan oo Hogaamin leh.
- **Yoolal ku meel gaadh ah:**
  - **Naadiga Isbedel** (bar kulan lagu tabobaro dhalinta)
  - **BuugDoon** ( akhrinta iyo koobista buugta wanaagsan)

### 3. Deji qorshe.

Yoolalkan yaryar u sii kala jabiyo Hawlo yaryar, qor waqtiga ay hawl kasta bilaabmi doonto iyo xiliga ay dhamaan doonto.

### Tusaale:

- **Naadiga Isbedel**
  - Diyaarinta Casharada Jan/2022 – Feb/2022
  - Diiwaan gelinta Ardeyda March/2022– Apr/2022
  - Bilawga Casharada Apr/2022 – August/2022.
  - Imtixaanka Shahaadiga ah Aug/25/2022
  - Xaflad weynaha Qalinjabinta Sep/15/2021

### 4. Qiyaas oo Qiimee

Qiyaas wixii ku hirgalay adiga oo eegaya inta yool ee yaryar ee aad ku guulaysatey, qiimee boqolkiiiba intee ayaad qabatey se maxaa kuu hadhsan.

## 5. Joogtee haba yaraato e'

Ku dedaal inaad si joogto ah wax u qabatid, ka shaqee mashruucagan si maalinle ah, ama si todobaadle ah oo ku dedaal inaad maalintaas ama todobaadkaas aad wax ku darsatey mashruucaagii.

Haatan iyo imika mashruucaagii uu dhanyahay, Abaalkaaga Ilaahay ku sug, noloshaada ka eeg barakadiisa. Hambalyo.

## 8/30 Keli noqo

aan ku siiyo talo ay yartahay dadka yaqaanaa, dadka sameeyaana ay kasii yaryihiiin:" **Keli noqo**"

Waqtiyadan danbe waxa aan isku arkay dhaqanka ah Jacaylka kelinimada ama gaar noqoshada, xaqiqna aan kuu sheegee aad iyo aad ayey wax ii tartay keli noqoshadu. Hadaba aan kaaga waramo sababaha.

Keli noqo waxa aan uga jeedaa in waqtii aad la qaadato naftaada, waqtigaasi ha koobnaado sida saacado ama ha dheeraado sida maalmo, intuba waa keli noqosho.

Dhaqanka Kelnimadu waxa aan ku jeclay wanaagyo badan oo ay ka mid tahay:-

- In waqtigaagii kuu dhowrmo, oo cid ku mashquulisaa ma jirto.
- Qorshayaashaadii oo kuu hirgala.
- waxa aad helaysaa fursad aad ku qiimayso noloshaada.
- Fikirka togan ee wax tara waxa uu kuu iman marka aad keli tahay
- Hal-buur ayaad yeelanaysaa.

Waxa la sheegaa in dhaqan keli-noqoshadu uu yahay astaanta dadkii waaweynaa ee dunida soo maray, oo diinta Islaamkuba waxa ay ka bilaabantey godkii uu keligii ku cibaadaysan jiray Nebi Muxamed NNKH, waxaana la

sheega in la jeclaysiiyey kelnimada markii uu kusoo dhawaadey 40 jirkiisii.

Keli-noqoshadu maaha macnaheedu dadka ka go', balse waxa ay ku baraysaa inaad dadka kale xad u samaysid aanay soo dhaafin.

## 9/30 Mustaqbalka maxaan noqon doonaa?

Miyaad taqaanaa su'aasha ugu badan ee aanay weligood macalimiinta ka daalin in ay weydiyaan ardaydooda?

- Mustaqbalka maxaad rabtaa inaad noqotid?

Hadaba aan anigu maanta kaaga waramo waxaan ku riyoон jiray in aan noqdo mustaqbalka.

Waqtigii aan Aadka u yaraa waxa aan jeclaa in aan noqdo baylood (Duuliye) taasna waxa aan kala mid ahay dhamaan caruurta yaryar ee kuligood wada jecel noqoshada bayloodka, oo tolow maxaa loogu sheega? ....mooyi.....aan ka socdo.

Mar kale oo aan weynadeey waxa ay igaga dhagtey in aan noqdo chemist (Chemistry-yahan) si aan u sameeyo waxyaalo dadka wax u tara oo waxa jirtey maalin aan is-khatar geliyey aniga oo ku sumoobi gaadhey wax aan isku dardaray, mar kale waxa aan aad ugu riyaaci jiray in aan noqdo Dambi-baadhe.... Waa beri aan daawan jiray Sherlock Holmes, waqtii ayaa jirtey aan aad u jeclaa in aan noqdo qoraa buugtiisu ay saamayn ku yeeshaan caalamka, waxa jirtey mar aan jeclaa in aan Madaxweyne noqdo waxaa aanan illobeyn calamadii aan u sawir jiray dawlada aad hogaamin doono. Arrimahaasi dhamaatood waa ididiiladii caruurnimo iyo riyooyinkii aan dhisan jiray waqtigii aan yaraa.

Maxay u hirgeli waayaan riyoo yinkii caruurnimo? Maxaa keena in marba aad wax ku riyoota ka duwan wixii hore? weydiimahaasi waa sheeko kale oo waqtii kale aynu ka doodi karno. Lakiin Meel ku qoro arrinka soo socda.

Ceeb maaha inaad riyootaa, ceeb maaha in riyodaadii kuu hirgeli weydaa, se waxa ceeb aan yarayn ah in aanad riyoon ba, waxa ceeb kuugu filan in nolosha aanad waxba ku fiicneyn sxb.

## 10/30 Joogso inyar

Nin boqo ahaa ayaa u baahdey koob biyo ah, nin ag-fadhiyey oo Caalim ahaa ayaa ku yidhi “imisaad siisan lahayd boqoroow koob biyo ah hadii aad waayi lahayd”. Wuxuu ku jawaabey “Boqortooyadeyda kala badh ayaan siisan lahaa” ninkii caalimka ahaa ayaa hadana ku celiyey “biyihii aad cabtey kaadidoodu hadii ay kugu dhagto maxaad siisan lahayd” wuxuu ku jawaabey boqorkii **“Boqortooyadeyda kala badhka soo hadhay”**. Hal koob oo biyo ah ayuu siistey ninkani boqortooyadiisii oo dhan.

Horta maxa aynu nimcada u dareemi weynaa marka ay tagto mooyaane? Maxaynu u ogaanaa in aynu xaalad fiican ku jirney hada ka hor waa inta aanay dhibi ku qabsane?

Maxaynu u dareenaa macaanka Hooyada marka ay tagto? Maxaynu u weyna xanaaneyntii Aabo marka uu baxo? Maxaynu u dhadhansanaa caafimaadka ka dib marka uu xanuun bedelo? Maxaynu u ogaanaa muhiimada dhalinyarnimo marka ay baxdo oo la soo qaban kari waayo?

Indho ayuu Ilaahay ku siiyey aad wax ku aragto, dhago ayaad leedahay aad wax ku maqasho, carab ayaan lagu siiyo aad ku gudan karto baahidaada hadal, Maskax aan nasan habeen iyo maalin ayaad haysaa la'aanteed maryaha ayaad tuuri lahayd, waad cago qabtaa oo meel

kasta oo aad rabtid waad tegi kartaa adoon dhib ka arkayn, gacmo ayaad leedahay qofka la'i uu aduun oo dhan ku bixin lahaa sidii uu u heli lahaa bal nala soo eeg suuqa tiknoolojiyada caalamka ee tartanka ugu jira sidii ay u samayn lahayeen gacmo caadi ah oo dad-samee ah (Artificial).

Tag oo soo eeg Xabaalaha si aad u ogaato qiimaha Nolosha, tag oo soo eeg Xabsiyada si aad u ogaato qiimaha xorriyada, tag oo soo eeg xarumaha dhimirka si aad u ogaato qiimaha caqliga, tag oo soo eeg cusbitaalada si aad u ogaato qiimaha caafimaadka.

Joogso ilbidhiqsiyo kooban oo bal u fiirso wixii uu llaahay kuugu gallad yeeshay, Qoys, caafimaad, waqtii, dhalinyarnimo, Ehel iyo qaraabo, aqoon iyo waxbarasho, amni, Imaan iyo Islaamnimo, laba waalid oo ku jecel, xorriyad ..... adigu sidaas uun usii wad dabadeedna llaahay ugu mahadnaq si laabta kasoo go'dey kuna ducayso in uu kuu llaaliyo.

## 11/30 Birriqbirriq ha noqon

Weligaa ma isku aragtey dhaqankan xun?

Hawlayaad bilaabaysaa sida waxbarasho cusub, buug cusub, luuqad cusub, jimicsi ...iwm dabadeedna maalmaha hore xamaasadaadu waa cirka, se maalmo kooban ka dib kiiba ma tihid, hawshiina waad ka caajisaysaa ama farahaad ka qaadaysa? Hadii aad isku aragtey dhaqankan ogow waxa aad tahay **birriqbirriq**.

Waqtigii aanu yarayn ee aanu daawan jirney musaaracada (Lagdanka) ayaa waxa jiray rag ciyaarta kusoo galaa dardar kulul markaasey ciyaarta shidaan, hase ahaato e' hal feedh oo lagu dhufto ayuu la suuxi jiray ciyaartana lagaga badin jiray, dabadeedna waxa aanu u naqaaney noocaas **birriqbirriq**.

Inta badan dhaqankani waa mid ku dhaca dadka jecel in ay isbedel sameeyaan, laakiin carqalad weyn kala kulma sidii ay u dhamayn lahaayeen wixii ay bilaabeen, hadaba aan ku baro arrimo aad dhaqankan kaga adkaan kartid.

1. Marka ugu horeysa ha isku qaadin wax aanad itaal iyo awood u lahayn, dib ugu noqo awoodaada.
2. Hubi inaad waqtii u helayso hawshan aad rabto.

3. Ku dedaal in aanad isku badin arrimaha

**Tusaale:** baro hal maado ama hal course, iska jir dhowr maado in aad mar wada bilawdo.

4. Xamaasada kama soo hadhee maalmaha ugu horeeya bixi dedaal badan, hadii aad wahsi iyo caajis ku bilawdid sidee ayaad dhamaadka ku gaadhi.

5. Meel ku qoro Ujeedka aad hawshan u bilawdey.

**Tusaale:** **Waxa aan rabaa in aan barto Carabiga oo Diintey ku fahmo waqtii dhan Hal Sanno.**

6. Marka aad aragto inaad caga-jiid bilawdey dib u milicsi ujeedkii aad hawshan u bilawdey.

7. Naftaada ballan adag la gal in aanad ka bixin go'aankaagaas.

8. Caajis waa kii imaada, laakiin ha isu dhiibin wahsiga, wixii ku hirgeli waayona ka daba tag, iska jir quusta qaddiman.

9. Isku dey inaad dabbaaldegto marka kasta oo aad hore u socotid.

**Tusaale:**

Bil kasta oo aad dhamaysato barashadaadii carabiga naftaada u mahadnaq oo cun ama cab ama soo gado waxaad jeceshahay.

10. Ugu dambeyntiina mar kasta dib ugu noqo Ujeedkaagii 1aad ee hawshan, dib u milicso halkii aad kasoo bilawdey iyo inta kuu hadhsan ee kooban, Ilaahayna la kaasho.

## 12/30 May...MAYA

Haddii aad rabto guul dheh “**Maya**”, guushiiba intaas aaya kaa xigta. Soo ma fududa?

In badan ayaan nafteyda ku canaantaa in aan ku liito dhehistaa “Maya” waxa hubaal ahna hadii aan barto dhaqankan in aan wax badan guul ka gaadhi karo.

Marka aan ku leeyahay dheh erayga “MAYA” waxa aan uga jeedaa in aad naftaada u diido wax kasta oo kasoo horjeeda dantaada, si fudud hadii aan kuugu sheego waa naftaada xakamee.

May ku dheh naftaada marka ay soo jeed rabto, may ku dheh naftaada marka ay hurdada badan rabto, may ku dheh akhriska ka caga-jiido, may ku dheh marka ay masjidka ka daahi rabto, may ku dheh rabto iska fadhi, may ku dheh marka ay rabto in ay maqaaxi ka nacnaclayso, may ku dheh marka ay in ay iska damaashaado iyada oo aan waxba qaban, may ku dheh marka ay rabto in ay dunuub dhex dabaalato.

Erayga “May” haku koobin naftaada ee may ku dheh asxaabtaada aan waqtina ku dhowreyn waxna kuu kordhin, may ku dheh qof aan waxbarasho ku fiicneyn, may ku dheh mid aan shaqo wanaagsanayn, may ku dheh mid aan ku ixtiraamin, may ku dheh mid balwad leh, may ku dheh mid calaacal badan, may ku dheh mid aan nolosha madawga mooyee aan khayrba sheegin.

Marka aad eraygan si dhab ah u hirgeliso, adiga ayaa kasoo sheekayn doono waxbtarkeeda, ogowna guushu mar waa **Haa** marka ay noqoto waxa fiican marna waa maya marka ay noqoto wax xunoo aan dantaada ahayn.

## 13/30 Dhalinteenii ma dawarsato ayey noqdeen

Mar kasta oo aan arko inankan waxa aan dib u xasuustaa dhacdadii nasoo kala dhex martey dhowr sanno ka hor, waxaabad moodaa in ay shalay ahayd.

Ninkani waa nin dhalinyar ah inuu iga waynaado mooyee igama yara, waa nin ay karti ka muuqato waana nin wax bartey sida uu u eeg yahay. ninkan weligay sheeko namay dhexmarin oo isma naqaano, in aan meelahaas ku isku aragno mooyee.

Subax aniga oo meel maqaaxi ah ka shaahaynaya ayuu ila soo fadhiistey, ka dib salaan diiran iyo dafdaf aan caadi ahayn oo socotey ku dhowaad ilaa 30 daqiiqo waxa uu sheekadiisii ku soo af-jaray isaga oo dhegta ii saaraya “*walaal moobilki ayey wax iga xunyihii ee \$2 oo iga dhiman igu caawi*” aniguna siiyey, maalinkaas ayaa ahaa kii noogu horeeyey nooguna dambeeyey ee aanu isa salaano, maalin walbana waanu is aragnaa inta badan.

Horta waa su'aale maxaa farqi u dhexeeye **Dawarsiga** iyo **shaxaadka**? Miyaanay labaduba ahayn qof kale wax waydiiso oo gacanta hoose yeelo isna gacanta sare ha yeesho.

Waxa wax lagu xumaado ah in dhalinyarteenii in badan oo ka mid ahi noqdeen dawarsato ku dul nool dadka kale, iyaga oo xoog, aqoon, farsamo wax ka maqani aanay jirin,

hadaba ma kuwaas ayaa dalkan meel gaadhsii doona iyagii isku filnaan waayey?

Waxa uu Rasuulkeeni Muxamed NNKH ina baray in qofka dadka wax weydiistaa uu yimaado maalinka qiyaamaha isaga oo aan wax hilib ahi saarneyn wejigiisa.

Saaxiib shaxaad badne ogow qiyaamaha foolxumadaas ayaa ku taal, aduunkana cidi kuma jecla ee sidaas isku ogow.

## 14/30 Goobadii layaabka badnayd

Sheekadani waa nin macalin ah oo si fudud caan ku noqdey, hanti badan ka helay farsamo yar oo aanad rumaysan doonin in ay sabab u ahayd guusha macalinkan.

**Alex** waa macalin xisaabeed ka shaqeeya dugsi hoose, maalin maalmaha ka mid ah ayaa uu sawiray Goobo (Circle) dhamaystiran oo aan wax qalloon ah lahayn isaga oo ku sawiraya gacmihiiisa oo keliya wax qalab ahna aan adeegsanayn.

Arrintani waxa ay soo jiidatey ardeydii dugsiga, inyar ka dibna ardey ayaa ka duubacay muuqal macalinkii oo sawiraya goobadii, dabadeedna waxa uu soo dhigay youtube-ka, halkaas oo lagu daawaday 100 kun oo jeer (100k views) maalmo kooban gudahood, imikana waxa ay maraysaa 36 milyan oo daawasho.

Ninkii macalinka ahaa waxa uu noqdey xiddig waqtii yar gudihiis, halkaas oo lagu waraystey Tv-yada ugu caansan aduunka waqtigaas, waxa uu arrintan ka helay lacag badan taas oo guri uga dhisay ayeydii, dugsi u gaar ahna uu ka furtey lacagiisaas, bas cusubna waxa uu ugu deeqay dugsi si loogu shaqeeyo ardayda dugsigaas.

Macalinkani waxa uu sheegay in uu ku tabobaran jiray sawirista goobadan 200 oo jeer maalin kasta, halkaas oo

uu qaldi jiray inta badan 10 jeer oo keliyana ay u hagaagi jirtey,

Hal cashar hadii aan kala baxay sheekadan waxa uu yahay: Saaxiib Hal arrin oo aad ku fiicantahay dooro, si maalinle ah ugu tabobaro, ha daalin, ha caajisin, dulqaad samee inyar ka dibna waxa aad ku raaxaysan doontaa midhaha dedaalkaagaas Insha Allaah.

## 15/30 Maxaa u kuu hadhay walaal?

Waa nin waalan oo hadana fayow, uu caafimaad qabaa marka aad aragtid hadana xanuun daran ayaa haya, waxa uu afkiisa igaga yidhi waxa aan u dhawahay in aan isdilo, imikana jidkeedii ayaan hayaan geerida oo madaxa ayaa gidaarka ku garaaca habeenkii si aan u nasto, tani waa xaalada nin aan caawa la kulmay ee ila akhriso.

Nin kani waxa uu kasoo jeedaa reer fiican oo ladan dhaqaale ahaan oo isku xidhan qoys ahaan hase ahaato e' isagu waa gooni u socod, dhaqankiisa xun iyo dabeeecadiisa gurracan ayaa qoyskii ka dhex saartey uu ka midka ahaa.

Reer ayuu sameeyey waqtii hore se gacantiisa ayuu ku burburiyey oo gabadhiisii way kala tageen ..... oo yaa la joogi kara ninkan dabeeecada xun, ninkani keli ayuu ka door biday badhaadhii uu qoys yeelan jiray.

Ninkani shaqo marka ay noqoto meelna kuma raago, intaas oo shaqo oo fiican ayaa laga soo eryey mar kastana isaga ayaa gacantiisa isku erya, maanta wax camal ah oo hagaagsan ma hayo.

Cibaado ma yaqaan addoonkani, waxa aan ka maqley isaga oo leh 6 sanno salaad ma tukan, kollay mar hadii ay salaadii sidaas isku yihiin wixii kalena ha joogaan.

Muuqaalkiisa hadii aad aragto bahal mooye qof odhan maysid, waxa uu noqdey sidii katabaan maryo ay

sudhanyihiiin, habeenkii ma seexdo, shaydaanna calan ayuu ka taagtey oo bahal waswaas la yidhaahdo ayuu ku asqeeyey heer uu gaadhsiiyo in uu kitaabka ku kaajo ama uu biyo isaga keeno..... Ilaahayoow na cafi.

Aan kuu sheego ninkan halka laga raacay, waa jaadka iyo walaaladii, Jaadja ayaa baray soo jeedka habeenkii iyo hurdo la'aanta, isaga ayuu ku bartey rakaab xun iyo dad aan hagaagsanay, isaga ayuu ka bilaabay leexashada, intaas waxa uu raacdey sinoda iyo daawashada aflaanta xunxun taas oo noqonaaya jaadka walaaladii.

Saxibkayow Alxamduu laah dheh hadii aanad halkaas gaadhin, ogowna in jaadku iyo balwaddu guud ahaanba ay tahay halka uu qalloocu ka bilaabmo, jaadku waa albaabka laga galo xumaan wixii kasoo hadhay, Walaalow ha dhiman inta aanad dhiman, ha guban inta aan aakhiro la gaadhin, iskana jir Jaadka iyo Walaaladii Rabbina haku dhowro.

## 16/30 Shaqo laguma taajiro

Nin baa laga hayey “*Weligeed lama arag nin ku taajiray shaqo uu qabto laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 5 galabnimo*” aniguna waxaan kuugu soo koobey “*Shaqo laguma taajiro*”.

Indhahaaga fur oo hareerahaaga eeg miyaad aragtey ama maqashay nin shaqaale ah oo maalqabeen ku noqdey shaqaduu hayey waa hadii aanuu tuug ahayne. Wuxuu aad doontid noqo Wasiir, agaasime, xildhibaan, gudoomiye, xog-haye, macalin, askari... iwm weligaa kama taajiri doontid mushahar aad qaadatid oo ku kooban afka iyo gacanta.

Waxa aan bartey in barako la geliyey ganacsiga sida uu doono ha noqdee, waqtii waa ay qaadan doontaa se ogow hadii aad la timaadid kartideeda adiga oo yar ayaad nasan doontaa oo xoolahaagu kuu shaqayn doonaan, ee imikaba qorshaha ku darso ganacsi abuurkiis.

Intaas hore aan wax kuugu daro:

Waqtigan aynu hadda joogno fursadaha ganacsigu aad iyo aad ayey uga fududaadeen waqtigii hore Internet-ka awgii, ee ku dedaal inaad samayso ganacsi xidhiidh la leh Internet-ka waayo si fudud ayuu kuugu qarxi karaa.

Saaxiib inta aanad ku dul dhiman shaqo aanay cidi kuu ogeyn dedaalka aad geliso, inta aanad arag aduunkii oo kaa dul tallaabsadey, inta aanad cimrigaaga ku waayin u

shaqaynta dadka kale Qorshee sidii aad ganacsi kuu gaar ah u yeelan lahayd kaas oo wax ku tara dadkuna ka dheefaan. sxb kusoo biir naadiga lacaglayda oo horey ka faakihayso. ☺

## 17/30 Sariirta iska hagaaji

*“Hadii aad rabto inaad caalamka wax ka bedesho sariirtaada hagaajiso....”* Sidaas ayuu ku bilaabay hadalkiisii ninkan oo ah sarkaal sare oo khudbad u jeedinaya ardey qalin jabinaysey.

Inaad sariirtaada hagaajisaa wax fudud ha u qaadan waayo:-

1. Hagaajinta sariirtaada marka aad ka kacdid waxa ay ka dhigantahay hawl fudud oo kuu hirgashay, taasina waxa ay keensanaysa in ay hawl kale ku qabsoonto, hadana mid kale, hadana mid kale sidaas uun u sii wad.....
2. Waxa dadka waayo araga ahi talo ku bixiyaan inaad ku bilawdid subax kasta waxa loo yaqaano “**Guulaha yaryar**” kuwaas oo ah qabashada hawlaho yaryar. Intii aad hawl weyn maalintaada ku bilaabi lahayd qabo arrin fudud oo ku dareensiya guul yar inaad gaadhey sida hagajinta sariirta oo kale.
3. Hagaajinta sariirtaadu waxa ay ku dareensiinaysaa inaad masuul tahay oo hawli ay ku sugayso, weligeedna qof masuuliyad isasaaray ayuunbaa noloshan ka midho keena.

Saaxiibkayow Muslimka ahaw adigu waxa aad subaxaaga ku bilaabi kartaa guulo yaryar, tusaale ahaan Kicista hore si aad usoo tukato, weyseysiga,

Cadayashada, kicinta dadka kula hurdey, ku tukashada safka hore ee masjidka, Adkaar aad soo akhrisato, ducada salaada ka dambeysa intaas iyo qaar kaleba waa aad ku bilaabi kartaa. subaxaaga, intaasi hadii ay kuu hirgashona waxa lagaa sugaaba waa inaad caalamkan wax ka badesho.

## 18/30 Mas'uul miyaad seexatey?

Tani waa farriin ku socota saaxiibkayga aan mas'uuliyadba isa saarin, waa ninka aan xilba isa-sarin, waa ninka u haysta inuu caruuryahay ... Haa sida caruurta in masuul laga yahay, waxa aan la hadlayaa ninkii iska seexdey isaga oo wax looga fadhiyey.

Mudane Sxb

Ogow masuul ayaad ka tahay naftaadan, sidii aad uga badbaadin lahayd naar ololaysa, adiga ayaana ka masuul ah sidii aad janno u geyn lahayd naftaadan.

Masuul ayaad ka tahay inaad naftaadan wax-barto, waxa aan ka hadlayaa aqoon kuu sheegta maxaa kuu xalaal ah se maxaa kaa xaaran ah? Waxba ha iiga sheekayn shahaado jaamacadeed oo aan ku barin xalaal-miiradka, dabadeedna baro wixii aan ku xoongan lahayd adduunkan aan jaahil waxba looga tagin.

Masuul ayaad ka tahay Qoyskaaga hooyadaa iyoaabahaan laga bilaabo, waxa lagaaga fadhiyaa sidii aad uga farxin lahayd, sidii aad ugu celin lahayd wax ka mid ah rafaadkii iyo daalkii ay kusoo geliyeen, waxa xiga reerkaaga hadii aad xaas tahay oo yaad ku halaynaysaa mustaqbalka ubadkaaga ninoow.

Masuul ayaad ka tahay diintan sidii aad faafin lahayd, ogow in caalamkani diin la'aan meelna gaadheyn, si dhab ah aan kuugu sheegee Islaamk aan kula weyneyni waa

dawada caalamkani uu maanta ugu baahi badanyahay, hadii aanad weli halkaas gaadhina bal nala soo eeg suuqa reer galbeedka... wallee inaad yaabi.

Saaxiibkayoow dalkan masuuliyad ayaa kaa saaran, jooji calaacalca oo dalkaaga dhis oo dhiso, ha isweydiin muxuu dalkaygu ii qabtay ee is weydii maxaan dalkayga u qaban karaa waa sidii laga hayey Kennedy.

Aan kusoo xidho farriintan dheere, inta aad is-dareensiiso masuuliyada kaa saaran naftaada, diintaada, qoyskaaga, iyo dalkaaga ayaad guul u dhawdey weligeedna qof damiin ahi waxba ma qaban.

## 19/30 Quraanka ku akhri.

Waqtii aan sidaas usii fogeyn ayaan bilaabay in aan akhriyo quraanka, barakada aan ka helayna Ilaahay ayuunbaa og, barako ah dhinaca waqtiga, barako dhinaca maalka ah, barako dhinaca shaqada ah iyo barakooyin kale oo badan, sirtana waxa aan kuugu sheegi doonaa qormadan.

Waa marka horee Quraanka awalba waan akhrisan jiray – Ilaahay ayaa mahad leh- hase ahaato e’ in danbe ayaan waxa aan isku arkay mashquul badan iyo waqtii yar oo aanad waxba haleeli Karayn, aniga oo sidan ah ayaan maalin daawaday muuqal aad moodo in uu aniga iga warramaayo dhinaca mashquul badnaanta, waxaanan ninkaas ka faa’iday muuqaalkiisaas arrinkan “ *Quraan ku bilaw arrin kasta oo aad rabto qabashadiisa* ” waa farriin fudud se marka aad tijaabiso noqon doonta wax noloshaada wax ka bedela.

Waxa aan bilaabay maalinkaas iyo wixii ka dambeeeyey in aan akhriyo Quraanka marka aan shaqoda bilaabo, marka aan guriga yimaado, marka aan caruurtayda wax u dhigaayo, marka aan mashruuc cusub bilaabi doono, iyo mar kasta oo ay hawli u sugayso, waxaanan arrintan ka dheefay barako uu Ilaahay uun ogyahay, waxa aan dareemay wixii waqtii badan igu qaadan jiray in uu waqtii kooban

iigu dhamaado, wixii adkaan jirayna uu ii fududaaday.  
Waxaasina wax kale maaha ee waa barakada quraanka.

Quraan ku bilaw hawlahaaga marka aan ku leeyahay maaha macnaheedu quraan badan akhri, waxa aad akhriyi kartaa suurad, laba suuradood, hal bog hadii aad doontidna bogga kala qaybso oo badh akhri, muhiimadu waa quraan akhri.

Waxa intaas kuu dheeraan doona in aad abaal-marin ku heli doontid xaraf kasta oo aad akhrido, xarafkuna waxa uu kuu noqon 10 ajar, bal sawiro boqol xafar oo aad akhridaa inta ay abaal marin kuu noqon doonto.

Maanta laga bilaabo quraan ku bilaw hawl kasta oo muhiim kuu ah waxa aad arki doontaa barako aan xad lahayne.

## 20/30 Hal-ku-dheg aan jeclahay

Shirkada caanka ah ee Nike ayaa waxa uu yahay hal-ku-dhaggeedu “Just do it” oo macnaheedu noqonaayo Qabo (samee) oo keliya, in badan ayaan ka faa’idey weedhan bal adna maanta ila dhuux.

Hal-ku-dheggan waxa aan aad uga faa’idaa marka aan rabo in aan qabto arrin muhiim ah sida bilaabista koorso cusub, ama akhrinta buug weyn, ama duubista muuqaal dheer amaba mashruuc cusub hirgelintiis ...iwm. Waxa dhacda inaad dareento culays iyo mas’uuliyad weyn marka aad rabto bilawga arrin muhiim ah oo weyn sida kuwan kor aynu kusoo xusney oo kale, culayskaasina waxa uu kuu diidaa inaad bilawdid hawshii aad rabtey oo aad ka maagto, marka ay xaaladu bartaas kula gaadho adeegso Hal-ku-dheggan.

Hal-ku-dheggani macnihiisu waxa uu yahay qabo oo wax uun ka samee hawlaha kuu yaala, wax ka hirgeli arrinkan haba yaraato e’.

Ku dhaqan Hal-ku-dheggan marka aad rabto inaad Wax-barato se wixii ay kula adkaadaan, ku dhaqan Hal-ku-dheggan marka aad shaqo-doон tahay meel aad ka bilawdana aanad garanayn, ku dhaqan Hal-ku-dheggan hadii aad guur-doон tahay arrimihiina ay kugu baaheen, ku dhaqan Hal-ku-dheggan hadii aad buurantahay oo aad rabto jimicsi miisaanka kaa

yareeya, ku dhaqan Hal-ku-dheggan hadii aad jaamici tahay Imtixaankiina kusoo dhawaadey.

Waxa inta badan la arkaa hawl wax weyn u eekayd intii aan la guda gelin in ay noqoto wax fudud marka la bilaabo taasina waa sababta aan kuu leeyahay bal samee oo qudha.

Meel kasta oo noloshaada ka mid ah waad ku dhaqmi kartaa Hal-ku-dheggan wax wayna waa ku tari karaa hadii aad dhuuxdo xikmada ku dhex qarsoon.

Ugu dambeyn waxa aan u mahadnaqayaa shirkada Nike ee na bartey Hal-ku-dheggan.

## 21/30 Talooyin u gaar ah ShaqoDoonka

Waxa aan kula wadaagi doonaa talooyin khuseeya qof shaqo raadis ah wixii aan maqlay, arkay ama aan bartey inti aan shaqo iyo shaqo-doonimo kusoo jiray.

1. Hadii aad shaqo hore u weydo tijaabi inaad lacag la'aan ku shaqayso si laguu barto, adna aad u heshid khibrad kugu filan, hadhawna wixii shaqo soo baxa adigaa mudnaanta yeelan doona.
2. Isku day inaad samaysid shaqooyin isxilqaan ah (tadawuc) si aad bulshadaadii wax ugu soo celiso, adna aad khibrad uga heshid, hadhowna aad cv-ga ku darsatid.
3. Shahaadada Degree ah ee aad la ordaysidi macno badan samayn mayso hadii aanad ku qurxin xirfado, koorsooyin, iyo tabobaro wixii aad soo qaadatey.
4. Cv qurux badan samayso, adiga oo si fiican ugu dhex muujinaya kolba shaqada aad xaraynayo.
5. Mar walba CV-gu diyaar hakuu noqdo, waxa dhacda in si kedis ah meel lagaaga yeedho sidaas awgeed diyaar ahow mar walba.
6. Inta aad shaqo doonka tahay iska jir inaad noqtid qof xidhixidhan, dadkaaga dhax-gal, muuji dabeecad wanaagsan iyo furfurnaan si aad dadka u soo jiidato.

7. Shaqo raadinta ka dhigo shaqo rasmi ah, subax kasta kac xili hore sidii aad meel u shaqo tageyso oo kale, soo noqo xiliga ay dadku shaqooyinka kasoo rawaxaan, sidaas si aan ahayn waxba ku heli maysid.
8. Ma xuma hadii aad iskaashataan asxaab kale si aad u wada ugaadhsi tagtaan, dhiirigelin ayey idiin noqon arrintaasi, awoodna waxa aad saari doontaan shaqo bixiyayaasha aad u tegi doontaan.

## 22/30 Shaqaale aan la gaadheyn

Si aad u noqoto shaqaale aan la badeli Karin, si aad u noqoto shaqaale hormood u ah inta kale, si aad u noqoto mid la wada jecelyahay sidan samee:-

1. Goob shaqo marka la joogo waxa badan dareenka taban (Negative) ee ay shaqaaluhu ka muujiyaan goobta shaqo, maamulka sare, iyo hantiilayaasha shirkada sidaas awgeed isku day inaad wanaag ka muujiso shaqada adiga oo aan asxaabtaadana ku waayeyn. Shaqo kastaaba wax ay kaga wanaagsan tahay qayrkeed ayaa jira.
2. Shaqoda aad haysid wax ka baro, iskuna day inaad aqoontaada hormariso. Baro koorsooyin cusub, qaado tabobaro khuseeya shaqadaada, buug ka akhri laga qoray hadii ay jirto, wax cusub ka baro shaqodaada oo fuli.
3. Ha raacin asxaabta aad meel ka wada shaqaysaan inta badan, waayo fikir kale yeelan maysid aan ahayn shaqadii aad kasoo baxdeen mooyee.
4. Iska jir inaad nacamle u noqotid maamulka sare sida oo kalena iska ilaali inaad mucaarid ku noqotid, kolba dhinac tag sidaas ayaa ugu fiican.
5. Daryeel dadka aad u shaqaysid (macaamiisha), waji furan tus, u dhoolla cadee, qof walba xaqiisa iyo waqtigiisa sii, kuna dedaal inaad raali geliso waxaad ku heli darajo fiican.

6. Marka ay shir noqoto hadalka yarayso, isku day inaad ugu dambeysyo dadka hadlaaya, hadii aad hadashona fikir togan oo hormarineed soo dhiibo, waxba aad ha uga hadlin dhibaatooyinka jira ee shirkada waayo taas cid waliba waa ay taqaanaa. Adigu xal keen.
7. Uruurso wixii ah shahaadooyin abaal-marineed, wixii tabobaro ah, mashaariic aad qabatey ama guulo aad gaadhey. Hadhow hadii aad shaqoda ka tagto ayey wax weyn ku tari.
8. Isku day inaad shaqodaada hagaajiso adiga oo Ilaahay ugu dhawaanaya waayo Ilaahay waxa uu jecelyahay marka uu addoonku shaqo qabto inuu qurxiyo.
9. Iska jir dadkan:  
Qofka xaasidka ah, qofka shaqoda xun, qof cabashada iyo calaacalka badan, qof nacamlaha ah, qofka shaqoda, qofka mushakiga ah iyo ka ugu daran oo ah qofka beenta badan.

## 23/30 Talooyin Guur-doон

Waa talooyin aan siin lahaa maanta Nafteyda hadii aan taaganhay halkaaga.

Guur-doон аяад тахай, тало иyo тусаалайн-na waa аad u баahantahay, сidaas awgeed aan ku siiyo talooyin guur-doон inta ugu fiican ee aan arkay, tijaabiyeey, maqlay amaba aan akhriyey.

Talooyinkani waxa ay u gaar yihiiн guur-doонка oo keliya..

1. Haku dheeraan Haasaawaha, balo dhami halkaas ayey ku jirtaa. Wax la hadh.
2. Keligaa meesha libaax kama tihid, booskan banaan dad badan ayaa ku tartamaaya ee ismacaashsiin.
3. Ha yaraysan taloda dadka waaweyn ee ah “gabadha reerkooda аяа la guursadaa” .. Waxba ha tirsan wanaaga gabadhi leedahay inta uu reerkoodu xunyahay.
4. Sxb Intaanad Guursan Ogow In Soddoхдаа Ay Tahay Maraykanka Oo Kale.  
Haddii ay raali kaa noqoto adduunka oo dhami wuu kuu sikhirmi (fududaan), haddii ay kugu kacdana liiska argagixisada iska eeg
5. Gabadhu sida aad tahay hakugu jeclaato maaha waxa aad haysato.
6. Yaan lagu waalin waxba kama jiraan maahmaahdan “ been kusoo xero geli runna ku dhaq” arrinku sidii hore maaha.

7. Ka maarmi maysid farsamooyinkii hore..... “Dumar kusoo basaasa gabadha dirso” waayo gabadh waliba waa dahab la mood marka ay haasaawe noqoto.
8. Hadii inta aad wada sheekaysanaysaan Dalabka kugu badiso iyo ii-keentu hadhowna taas toban jibbaarkeed diyaar u noqo..... waaaar imikaad dhowdhowdaye go'gaaga meesha ka qaado.
9. Iska jir qof kaa maqan inaad guursato, weligay ma arag dad isqaba oo kala maqan oo xaaladoodu degentahay.
10. Dooro gabadh xishood badan, Hawl-kar ah, Cibaado fiican, reer wanaagsanna kasoo jeeda intaas hadii aad isla hesho boqor ayaad tahay, nolol wacanna waad heli.

## 24/30 Talooyin Guur-doon 2

Waa talooyin aan siin lahaa walaashay

1. Iska jir faro-dheere, waa ninka aan joogsan ilaa uu jidhka gabadha gacanta saaro, waxaanad ogaataa maalinka uu raaxadiisa kaa dhamaysto in aanad wax qiimo ah agtiisa ku lahayn. Ilaasho sharaftaada.
2. Nin jilicsani waxtar maleh, waa ninka go'aankiisu aanuu gacantiisa ku jirin, waa ninka si fudud loo maamulan karo, ninkaas ka hadh marka ay arrimuhu adkaadan meelna ku wadi maayo.
3. Afka macaan iyo hadalka sonkorta ah waxba haku dagsoomin, inta uu adiga kugu idhaahdo in le'eg ama ka badan ayuu hablaha kalena la wadaaga inta badan.
4. Dooro qof aad is-fahmi kartaan oo aad isku da' tiihiin, iska jir in aad gacanta u gasho qof aad kaaga weyn ama kaaga yar.....weligiin is-fahmi maysaan.
5. Qof dhamaystiran heli mayside ku dedaal in aad ka hesho qofkaaga astaamahan: Diin, dad la dhaqan fiican, isku filnaasho maaliyadeed, Ixtiraam, dabeeecad wanaag, qoys fiican iyo balwad la'aan.
6. Nin reerkiinu aanay rabin ha u dhixin, gurigaagu yuu noqon faran laba jabhadood isku haystaan.

Waxa dhici karta inaad cidla ku dhacdo oo aad labadaba weydo hadhow.

7. Ninka damac guur idinka dhexeeyo hadii aad ku aragto shaki badan, ogow marka aad isguursataana inuu kasii dari doono. Imikaad banaanka joogtaaye kala nabad gala.
8. Marnaba ha filan wixii noloshii hore kuu suurta geli waayey inaad ninka ka heli doontid, ninkani maaha mashiinkii Riyoooyinka xaqiijin jiray walaal. Cirka ha geyn filashada aad ninka ka qabtid.
9. Cabashada yarayso, wax weydiinta ninkan iska jir, weligaa ha barbar dhigan ninkan nin kale, hadal badan ha yeelan, faanka iyo isla-weynanta ka dheerow, waxa aanad ogaataa in intaasiba ay yihin wax raggu ay dumarka ku nacaan.
10. Ninka guur kula soo hadal qaadaa waa nin rageed laftii waana nin ku sharfay, ee waxba ha ku xidhan inaad wada yeelataan jacayl socda dhowr sanno, arrintaas aflaanta hindiga ah ayaa loogu tagaa.
11. Qof ayaa kugu xumaadey waxba haku sii dhagsanaan keligiina aduunka ma joogo.
12. Ogow jacaylka dhabta ahi waa ka yimaada guurka ka dib maaha ka hor. Waa marka macmacaanku dhamaado si fiicanna la isu barto.

## Jacaylkaasi maaha Kaygii

Shalay ayey ahayd Maalintii Jacaylka Adduunka.... Sidaas ayey yidhaahdeene, maalin keliya aynu isjeclaano sanadkii, inta soo hadhayna nacayb ku noolow weeye.

" Wiil iyo gabadh xor ah ayaad tihin ee wax kasta sameeya, waxba ha dhagaysan xorriyad diidka iyo wadaadka dib u socodka ah, Jacaylkiina ayuunbaa ah jacayl, Jacayl kalena ma jiro"

Waxa aan is-weydiyaa waar jacaylkii goormaa sidan loo bahdilay, miyaanu Jacaylku intan ka qiimo badnayn, waa su'aal kale horta Jacaylku miyaanu ahaan jirin Cibaado llaahay loogu dhawaado.

Goorma ayaa jacaylkii lagu soo koobey mid ka dhexeeyaa Wiil yar iyo gabadh kasii yar, oo aanay waxba ka dhaxayn.

Miyaanu Jacayl ahayn, mise taloow waa wax kale.....

Jacaylka aan u hayo Hooyaday Macaan iyo Aabahayga qaaliga ah, jacaylka aan u qabo Xaaskayga aanu nolosha wadaagno, jacaylka ay naxariistu ku dheehantahay ee aan u hayo caruurtayda, jacaylka Walaaladey, ragga aanu soo wadaagney Nolol aan laga sheekayn karayn quruxdeeda, jacaylka sxbkay, Garabkayga aanan cidna ku doorsanayn, Jacaylka aan u hayo Dalkayga iyo Hoyga aan kasoo jeedo, Jacaylka dadkayga aanan cidna barbar dhigi karayn, ....Jacaylka aan u hayo intaas iyo in kasii badan.

Waa su'aale

Goorma ayuu noqdey jacayl dhab ah, jacayl ku salaysan dareen shahwadeed, dareen ku bilaabmey rabitaan jidheed kuna gabogabobey ciil iyo murugo, Goorma ayuu noqdey jacayl rasmi ah jacayl bilawgiisu warwar yahay, bartankiisu cabsi yahay, dhamaadkiisuna qoomamo yahay.

Ma jacaylbuu noqon, jacayl bilawgiisu uu dhuumasho yahay dhamaadkiisuna fadeexad yahay, Ma jacaylbuu noqon, jacayl xishoodkii burburiyey heer maanta lagu faano hablaayo aniga ayaa sxb la ah, Ma jacaylbuu noqon, jacayl guurka ka hor wax walba lasii dhamaystey, oo waa yaab e' maxaa lala guri geli, Ma Jacaylbuu noqon, jacayl inta/waqtiga hore la isku soo ordo marka danbena Block la isa saaro.

Hadduu kaasi yahay Jacaylkaaga, sxboow beri ayaan ka ahay.

Jacaylkaasi maaha kaygii!

## Aqoonyahan ha iigu yeedhin

Ilaahay baa igu og in marka horeba aanan ahayn dadka jecel erayaas, gartaydana aan kuu akhriyo. Horta heerkee ayaa lagu gaadhaa magacan?, goorma ayaa la odhan karaa Hebel ama Heblaayo waa Aqoonyahan?, ma Degree ayaa kugu simaysa Magacan, mise Master baa kaa xigta, ma Akhriskaaga oo bata ayaa lagu helaa Astaantan? mise waxa aad mutaysan kartaa marka aad wax qorto-qorto? facebook-na ku dhahoo.

Waxa aanan u jeclayn magacan waxa la socotaa dhowr Plus oo ah isla-weyni, oo maalinta laguugu yeedho ayaad noqon xidig soo baxay iyo qorrax ifaysa, waa sida aad isu qaadan doontid e'.

Waxa aanan u jeclayn Magacan waxa uu si toos ah kaaga hor istaagi karaa Aqoon raadiskii, oo yaad u baahantahay oo wax ku dheerba, miyaanad ahayn Aqoonyahan, Waar hadal oo dhuran intaas uun baa kaa maqane, talo kastana waxa aad u qaadanaysaa in ay tahay Dhaawac looga jeedo Darajo ka xayuubin, waayo aqoonyahanku ma qaldamo waxa kasta oo uu sheegaana waa Sax.

Aqoonyahanka maanta intiisa badan

ma aha nin aqoon soo saara, xitaa haddii uu yahay nin wax yaqaana, dadka uu ka sarreeyaa, adiguna caamo ayaad tahay wax loo yeedhiyo.

Aqoonyahanku waxa uu ka hadlaa Mawduucyo aan la fahansanayn, waxa uuna ku hadlaa luuqad aan noocba ahayn, adigu Mushakal iga dheh isugu jira Carabi -haba yaraado e'- iyo English eray kasta uu soo calaashaday, iyo Soomaali uu ku hadlo marka uu waayo erayo English ah.

Aqoonyahanku waa Agab (Tool) lagu shaqaysto, mar waxa uu daba socdaa Oday koofiyad sita, marna Siyaasi aan wanaag u hayn, marna Musharax hadda awrka ku kacsanaaya, mararka qaarna waxa uu kugula hadli afka reer galbeedka ( Gaalada ) isaga oo aan is-ogeyn.

Aqoonyahanku waa nin aan waxba ugu qaban inta uu yaqaano bulshadiisa, waxba ma dhaamo kuwa uu u yaqaan in ay caamo yihiin.

Walaal aan kusoo gabogabeeyo warka

Ka dib markii aan arkay, kuna qancay, si fiicanna aan uga baaraan degay, ka dib markii aan tashi la sameeyey naftayda waxa aan go'aan ku gaadhay in aanan noqon Aqoonyahanka, ee fadlan ha iigu yeedhin magacaas. Rabbi haku maamuuso.

## Gadhku gadhka aad moodey maaha

Gadhku waa haybad, haddii aanad lahayna wax weyn aaya kaa maqan, dabcan waa haddii aad lab tahay.... hada waxa aan ka hadlayaa gadh la sii daayo, haa iigu sheegin gadh in uu yahay afarta tin ee cid waliba leedahay anigana igu daroo.

Waxa inta badanna iska dhacda in dadka gadhka fiican lehi ay bulshada dhexdeeda ay sharaf ku leeyhiin, waa dhaqankeena Somaliyeed, diiintana waaba sunne sii deyntiisu....

Waqtigu waa salaad subax oo hore, halkaas waxa kasoo baxay nin aan meelahaas ku arko oo mar walba aan ixtiraam weyn u hayo, ma aqaano lkn gadhkaasii weyn ayaan ku qadariyaa.

Waxa uu bilaabey sxbkay in uu kusoo ordo jawaan weyn oo yaala meel cidla ah

Anigu yaabay, waar malaa wiil lasoo tuuray aaya ku jira, saani uma arko oo waa meeel iga fog meesha uu yaalo jawaankani.

Ninkii aaya bilaabey in uu faqo jawaankii, inyar ka dib waxba kawaa oo waa Jawaan xashiish ah uun, aniguna naxdiintii iga tagtey, bal sawiro naxdinta ay leedahay Ilma yar oo jawaan lagu soo ridey salaad subax ka dib,oo dhaxani jirto, dareen intee le'eg ayey leedahay... haddii

aanad dareemeyn xanuunkeeda adigu, anigu ma sawiran karo arrintaas foolxumadeeda iyo calool xanuunkeeda.... Aabo ayaan ahay maaha?!

Ninkii sxbkay Jawaankii soo jiid, isaga oo ka duwaaya waddadii, markaasaan gartey in uu xashiishkaas waddada ka qaadaayo, waxa aan markiiba aan bilaabey in aan hoosta uga duceeyo ninkaas, waayo qashin iyo dhibaato ayuu wadada ka duway, oo arrintaas yaa maanta sameeya, qof waliba uu eegaa dabadeedna uu iska dhaafaaye.

Jabba waa ka danbeeyee...

Ninkii waxa uu haddana uu ku ordey jawaan kale, isaga oo kii horena gacanta kusii jiidaaya..

Waxa aan bilaabay in aan isweydiyo; waar ninkan maxaa maanta ka galay jawaanadan xashiishka ah, ma kii hore ayuu tanna ku darsadey, waar ducadaadii la noqo malaa ninku caadiba maaha... hadalkiiba aniga oo aan dhamaysan ayuu isku shubay labadii jawaan ee xashiishka ahaa - waa sida aan u arkayey aniga iyo dadkii agoogay, laakiin malaa isagu wax kale ayuu u arkaayee – dabadeedna wixii ka daateyna gacanta ayuu ula tagey oo gur, ugu danbeyndiinta dhabarka ayuu saartey jawaankii xashiishka ahaa isaga oo ordaaya, si ay cidi ka qaadayso.

## Waa Fiin

Meel ayaanu wada fadhinaa aniga walaalkey Axmed, waxa noo soo galay 3 nin iyaga oo naga wareesanaaya adeegyada aanu bixino, kii ugu horeeyey ayaa bilaabay hadal isaga oo leh “ anigu waxa aan ahay Maxamed kan kalena waa Yaasiin kanna de waad wada garanaysaan.... waa Fiin”, aniga iyo walaalkey ayaa hadalkii kala boobney “ Haa Haa... dabcan oo yaan garanayn Fiin”.

Ka dib markii ay raggiil naga bexeen waxa aanu xaqiiqsanay in midkaayona garanayn Fiin, ileen waa nala jabsadey!.

Laba hudheel ayaa isku agyaala, mid dadku dibadda ayey tubanyihii halka ka kale aanay dadku ku badnayn, waxa hubaal ah waxa aad gelaysaa kaa dadka badani joogaan haba cunto xumaado e', waayo kanaa fiican miyaanad arkayn dadka badan.

Shirkad ayaa dad badani ku xidhanyihiiin, Adna waxa aad ku qasban tahay inaad ku biirto taas lagu badanyahay, Dugsiyada bal u fiirso halkee ayey waalidku caruurtooda ku daraan, de waa dugsi dadka badan, haba waxbarasho xumaado e', sidaas waxa la mid Jaamacadaha, Shirkadaha, Dhakhaatiirta ....iwm.

Haddaba si aad dadka u jabsato HAL arrin qabo, Samayso dad kuu jiibiya oo dadka kuugu sheega “ kanna de waad

wada garanaysaan ... waa Fiin” waana farsamo meelo  
badan wax kaaga tari karta.

Si aan laguu jabsanna si fudud ha ugu jawaabin “ Haa  
Haa... dabcan oo yaan garanayn Fiin” oo sidan ugu  
jawaab celi “ Adeer Fiinku yuu ahaa de? ”.

## Wadaad ma ahi

Eraygaas ma jecli in la igu yeedho gar iyo gar darro labadaba.

Haddii ay fiicantahay oo ay tahay darajo wanaagsan oo la gaadho ma jecli oo ma mudni darajadaas iyada ah.

Haddii nusqaan iyo yaraysi ay kaa tahayna, walaalow nafteyda kuumo ogoli inaad yasto.

Hase ahaato e' waa su'aale, Waa kuma Wadaad? Yaa loogu yeedhi karaa? Ma jiraan Astaamo lagu noqdo wadaad?

Hadalka oo kooban wadaad mihi

Wadaadka hadii aad u taqaanid nin iska miskiin ah – Miskiin waa haddii aad cay u haysatide – oo naftiisa mooyee wax kale aan ku filnayn walaal kaas ma ihi.

Haddii uu yahay qofkaas arrin aduunyo aan laga wareysan, walaalow kaasna ma ihi.

Hadii uu yahay qofkaas aan weli taariikhdi hore aan soo dhaafin, oo waaqica la joogo aan aqoon, inaadeer kaasna ma ihi.

Ma ihi wadaad cirka isla maraaya, dadkana u haysta caammo.

Ma ihi wadaad keligii saxsan, inta kalena ay wada qaldanyihiin.

Ma ihi wadaadkaas xanuunada bulshadiisa aan dawo u raadin.

Ma ihi wadaadkaas hadal wal oo uu maqlo u soo qaata sidii oo uu yahay caddayn aan caddayn u baahneyn.

Ma ihi wadaadkaas lagu dago afar eray oo English ah.

Ma ihi wadaadkaas lagu cabsi geliyo in aqoon maadi ah aanu lahayn.

Ma ihi wadaadkaas aan wax raad ah ku lahayn Nolosha iyo bulshada uu la noolyahay.

Ma ihi waddaadkaas ducoda oo qudha loo dhiibo haddii madal laga hadlaayo.

ma ihi wadaadkaas mar walba ka warama mushkiladaha umadda isaguna xal aan hayn.

Ma ihi oo ma ihi wadaadkaas,

Se haddii wadaadnimadu ay tahay dedaal, Horumar, Waxtar iyo intaas hore lidkeed Ogow waxa aan ahay wadaad.... waanan ku faanaya.

## 10 Sano oo macalinimo ah

Waxa aan Macalin ahaa waqtii intan ka badan, se hadda waxa aan ka waramayaa mudadii aan macalinka ka ahaa dugsiyada Hoose/Dhexe.

Sida oo kale waxa muhiim ah inaad ogaato in macalinimodu tahay shaqo aan rabo in aan ku god galo oo aanan ka tegin sinaba.

Waxa aan kusiin doonaa is kooban maxaan ka dheefay shaqadaas se maxaan ku waayey intii aan ku jiray shaqadaas, si aad uga faa'ido tijaabadii aan soo maray.

### Maxaa Dheef ah

1. Farxad aad dareemi doontid mar kasta oo aad aragtid arday guuleystey, Macalinku waa qofka 2aad ee ku farxa guusha Ardayga, hadii uu doono haba la dhaafo e'.
2. Xirfado Hogaaminimo, dadka ha u maamulin si garbo siman ah, ogow waa la isku jiraa.
3. Asxaab fiican, oo halkee ayaad ka helaysaa Asxaab sida Macalimiinta oo kale ah.
4. Awooda Saamaynta Ardayga, Hal eray ayaad ku bedeli kartaa Arday.
5. Inyar oo Lacag ah, hada waa Inyar miyaanad maqal weligii Macalin ma Taajiro.
6. Ardayda, Asxaabta berri aad meel walba kula kulmi doontid Insha Allaah.

7. Aqoon iska kooban oo ah inta aad ardayda aad u dhigitid.

### Maxaa dhib ah

1. Aqoon aan kordheyn, intaas buuga ku qoran ha dhaafin.
2. Jeeb aan naaxayn.
3. Maskax koobmaysa, fikir dugsiga ka baxsan weligaa heli maysid.
4. Mashquul aan dhamaanayn, haddii aad dugsiga joogtid shaqee, hadii aad ka maqantahayna soo shaqee.
5. Hal-abuur beri hore ayaad kala tagaysaan.
6. Isku ilaw goobtan, waxa aad arki adiga oo jooga goob waxbarasho waqti ku dhow 10 sano iyo wax ka badan.
7. Deegaan aan lahayn wax cusub, sanadkii hore oo sidiisii ah ayaa kusoo mari, wax farqi ah oo u dhaxeeyaa ma jiro 2020-ka iyo 2021-ka iyo 2022-ka iyo 2023.....

Mudane/Marwo isku eeg labadaas dhinac oo kolba kii kuu roonaada ku go'aan qaado, waa hadii aad rabtid inaad noqotid Macalin jooga Dugsi Hoose/ Dhexe.

## Waxa aad ismoodey maaha

Waxa ila soo hadlay arday raba in uu ka barto luuqadda carabiga ah maxadka aan masuulka ka ahay, waxa uu rabaa in uu ku biiro heerka ugu sareeya ee uu maxadku bixyo, dabadeedna waxa aan ka qaadey imtixaan tijaabo ah si aan u eego heerka uu la qabsan karo, ninkani waa nin isxariifinaaya oo cirka isla maraaya.

"Hadalkan Carabi u bedel: anigu waxa aan ahay Baylood (Duuliye) ka shaqeeya Madaarka" ayaan weydiiyey si aan u hubi heerka uu joogo, waxa uu iigu soo jawaabey hadal uu macnihisu noqonaayo " waxa aan ahay diyaarad madaarka fadhida" de ma waxaanan qosol ooyin baa.😊

Dadka in badan ayaa iska noocan oo kale ah, Diyaarad madaarka fadhida.

Waa Maamule aad u dabeeecad xun laakiin isu haysta in uu yahay Astaan lagu tusaale qaato dhanka dhaqan fiican iyo maamul wanaaga.

Waa ardey saaqid ah oo isu haysta in uu yahay Xariifka mar walba macalinku dulmiyo.

Waa iska hadle isu haysta in ay xikmadda afkiisa ka burqato.

Waa siyaasi fashilmay hadana isu haysta in uu yahay Hogaamiye aan dalkiisii joogin.

Waa Madaxweyne dib u socod ah hadana isu haysta in uu yahay Cumar binu khadaabka casrigan.

Waa Gabadh yar oo hoyadeed kadeed u dhamaysey isuna haysata in ay tahay baari aan cidi higsanayn, meel walbana ku qorta HOOYO MCN.

Waxa aan aqaana nin Cid kasta oo la shaqaysey ay habaarto habeen iyo Maalin dhibkiisa awgii, hadana meel walba kaga sheekeeya Isbedelka uu soo kordhiyey, haa isbedel uu keenay hase ahaatee waa Isbadel dhinaca kale ah.

Waar walaal warka aan kusoo koobo..

Waxa aad ismoodey maaha e' waa waxa aad tahay.

## Indheer garad noqo?

Hawl ayaad rabtaa inaad qabato waanay kugu adkaatey qabashadeedu, waxa ku dhiiri geliyana ma haysid, maxaad samayn lahayd?

Noqo indheer garad, xalku waaba intaas.

Cibaado ayaad rabtaa inaad samaysid sida soonka oo kale, dabadeedna waxa kugu batey saacadaha aad qatanaan doontid.... milicso qiyaamaha iyo dhibaatooyinkiisa iyo abaal marinta fiican ee aad ku heli kartid soonka maalintan, isbarbardhig ku samee dhibta maantada aad soomantahay iyo kunka sanno ee la joogi doono banka qiyaamaha, hadaad sidaas samayso waxa hubaal ah in uu kuu fududaan doono soonka maalintaasi, Indheer garad noqo.

Akhriska casharadaada ayaa kugu adkaadey.....milicso halka aad tagnaan doontid 4 sano ka dib haddii aad sii wado hawshan akhriska, Indheer garad noqo.

Culays iyo rafaad ayaad kala kulantaa Jimicsi aad si joogto ah u wadid..... Indhaha ka lali hawsha oo ku raaxayso sida uu noqon doono caafimaadkaagu iyo muuqa jidhkaagu hal sano ka dib.... noqo qof indheer garad ah.

gabadh ayaa si aad ah ula dhib mudatey Uur ay hadda sido, noqo indheer garad oo sawiro maalinta uu Ilmahaagu dhasho iyo xaflada afartan baxa losoo xaadiri

doono, iyo maalinta uu ku gacan qaban doono llmahaasi adiga oo da' ah.....noqo indheer garad ah.

waxa aad tahay Hooyo hawsha caruurteeda iyo rafaadkooda mar walba la dhib mudata, noqo qof indheer garad ah oo ka fikri sida ay xaaladaadu noqon doonto maalinka ay afartoodu ay usoo kala dheerayn doonaan raali gelintaada iyo ka farxintaada.

Dhib wal oo hada ku haysata, hawl kasta oo aad ku foogantahay imika marka aad dareento culayskeeda ka feker halka ay ku danbeyn doonto iyo midhaha aad ka heli doontid Insha Alla.

Noqo qof Indheer garad ah.

## Halkaagii

Si kadis ah ayey u kulmeen, ka dib waqtii dheer oo aanay is arag.

aan kaaga waramo e' waa laba nin oo yaraantoodii sxb ahaan jiray, isku xaafad, isku garoon, isku malcaamad, isku masaajid xitaa ku daroo isku dugsi hoose iyo sare labadaba.

maanta cabdi waa ilaaliye - guard - Dugsi, goobtaas oo uu ka shaqaynaayey muddo dhan ilaa 10 sanno, halka mustafe uu hadda yahay madaxa jaamacadaha ugu waaweyn dalka, isla sida oo kalena waa nin leh ganacsiyo fiican oo u shaqeeye.

midi waa nin caan ah oo magac ku leh bulshada, halka uu cabdi yahay nin qarsoon cidina sidaas usii garanayn, de adigu waa llaaliye uun.

ninkan danbe mustafe waa nin - Maasha Allaah- sanad walba wax ay u kordhaan, halka cabdi ka yahay qof meel uun ku qalalay, sidii sanam meel la dhigtay, ma wax macquul ahbaa taagnow halkii aad joogtey toban sanno ka hor, oo hadday sidaas tahay maxaad dhaantaa gidaarkaas.....haddii aad doontid adigu wax kale isku qanciyoo.

Mustafe iyo Cabdi waxa ay ku kulmeen masaajidkii xaafadooda ee weligoodba ay marna ku tukan jireen,

marar badana ay ku ciyaari jireen, halkaas oo ay is  
weydaarsadeen salaan iyo is-xaal wareysi, iyada oo ugu  
danbeyn uu mustafe weydiiyey Cabdi, su'aal aan waxba  
ka dhicin toogasho "Halkaagii"? oo u dhiganta soo  
halkaagii uun ma joogtid?